

Isbuuclaha BSD Nofeembar 9, 2020

Waxaan U Dabaaldegnaa Iskaashiga Bulshada

Maanta, waxaan maamuuseynaa labadeena u dambeeyay ee ku guuleystay dugsigaa hoose:

Dugsiga Hoose ee Fir Grove wuxuu helay abaalmarinta 2020 WE Award oo ah iskaashi uu la lahaa PTO iyo kan Pilgrim Lutheran Church. Markii uu saameeyay COVID-19, PTO iyo kaniisaddu waxay aruursadeen lacag si ay ugu iibsadaan kaararka hadiyadaha raashinka waxayna u sii gudbiyeen qoysaska inta qadada laga soo qaadayo iyo cunnada guryaha la keenayo. Fiiri si aad waxbadan uga barato.

https://youtu.be/u_YWwcCB-Xs

Dugsiga Hoose ee Elmonica wuxuu helay abaalmarinta 2020 WE Award oo ah iskaashi uu la lahaa Big Brothers/Big Sisters. Barnaamijka - oo loo yaqaan Beyond School Walls - waxaa ka qayb qaatay dhowr ka mid ah shaqaalaha shirkadda Nike. Fiiri si aad waxbadan uga barato.

<https://youtu.be/68hgFrAEsc8>

Maxaan loo qabaneynin Shirarka Waalidka iyo Macalinta sanadkan?

Sannadkan, wax ka beddelka jadwalka ayaa loo sameeyay si loo waafajiyo Barashada Fog ee Dhameystiran waxaana loo beddelay si loo isticmaalo waqtiga barashada. Degmadu waxay dooratay inay xafiddo maalmaha la-xiriirka ardayda halkii ay u qoondayn lahayd laba maalmood oo maalmaha aan barashada aheyn ee ardayda si ay shirarka waalidka iyo macallinka uga dhici karaan heerka dugsigaa hoose.

Booskii shirarka, waxaan ku darnay isbuucyo isku xirnaanta ardayda iyo qoysaska ee jadwalka iskuulka oo loogu talagalay in la siiyo fursado joogto ah oo loogu ee barayaasha iyo qoysaska si ay iskula xiriiraan.

Ardayda aan lala Socon ee u Baahan Caawintaada

Dhallinta aan lala socon waa dhalinyaro aan si joogta an ula joogin waalid ama masuul. Muddadii la gudajiray sanad dugsiyeedka 2019-20, waxaa jiray 3,700 oo arday ah oo aan lala socon Oregon. Beaverton, waxay ahaayeen 331.

Ardaydani waxay u baahan yihiin caawimaaddeena, gaar ahaan inta uu cudurkan aafadu socdo. Kaliya uma baahna meel xasilloon oo ay ku noolaadaan, laakiin sidoo kale waxay u baahan yihiin meel xasilloon oo ay uga xirmaan iskuulka meel fog. [Second Home](#) waxay siisaa guryo waqti-dheer ardayda aan lala socon si ay xooga u saaraan

dugsiga sare, qalin-jabiyaan oo u gaaraan yoolalka iyo himilooyinkooda. Second Home ayaa hada qoraneysa mutadawiciinta guryaha si loo daboolo baahiyaha ardaydaas.

Ma siin kartaa guri arday deegaanka ah? Haddii adiga ama qof aad taqaanid xiiseynayo martigelinta arday sannadkan, fadlan buuxi [Home Provider Application](#). Wixii macluumaad dheeraad ah ama haddii aad su'aalo qabto, email u soo dir Jenny Pratt Hale, oo ah agaasimaha barnaamijka Guriga Labaad (Second Home): jpratt@emoregon.org.

Ciyaaraha fudud ee Dugsiga Sare oo dib u bilaabmaya

Kaqeybgalka ardayda ee ciyaaraha fudud ee dugsiga sare ayaa laga joojiyay Degmada Beaverton School tan iyo markii ay bilaabatay xayiraadaha COVID-19 bishii Maarso. Si kastaba ha noqotee, Degmadu waxay oggolaan doontaa tababarka isboortiga iyo jimicsiga laga bilaabo **maanta**. Jimicsiyadan leyskama rabo oo wax saameyn ahna kuma yeelan doonaan meeleyn kooxeed aakhirka inta lagu jiro xilliga caadiga ah ee isboorti kasta. Mar labaad, kal-fadhiyadani waa uun tababar iyo jimicsi; kooxuhu lama tartami doonaan kooxaha iskuulada kale waqtigan. Intaas waxaa sii dheer, tababarayaasha looma baahna inay bixiyaan kulamadan; qaar ayaa laga yaabaa inayna dooran.

Waxii macluumaad dheeri ah, aqri [full announcement](#).

Toddobaadka Qaranka ee Cilmi-nafsiga Dugsiga

Kani waa Toddobaadka Qaranka ee Cilmi-nafsiga Dugsiga, kaas oo iftiiminaya shaqada muhiimka ah ee ay cilmi-nafsiga dugsiga iyo barbaariyayaasha kale ay ka caawiyaan ardayda inay horumar gaaraan. Mawduuca sanadkan waa "Awoodda Suurtagalnimada," oo diiradda saareysa rajada, koritaanka, adkeysiga iyo cusboonaysiinta. Hada, in kabadan abid, aqoonyahanada cilmi nafsiga ee iskuulkeena waxay ilo muhiim u ah u yihiin ardayda iyo qoysaska. Haddii ilmahaagu u baahan yahay taageero, fadlan la xiriir dhakhtarka cilmi-nafsiga ee iskuulkaaga.

Xafladaha Soo Socdo

Iskuul Majiro - Veterans Day

Arbaco, Nofeembar 11

Iskuul Majiro – Maalinta Saxida (Grading Day)

Jimco, Nofeembar 13

kulanka Shaqada ee Gudiga Dugsiga

Isniin, Nofeembar 16, 2020

6:30 p.m.

Meeting Materials

Kulankan guddiga wuxuu daarran yahay ka wada hadalka arrimaha khuseeya Saraakiisha Kheyraadka Dugsiyada (SROs), oo ay ku jiraan natiijooyinka sahanka bulshada ee xagaagii. Haddii aadan awoodin inaad kaqaybqaadato sahankan, aragtidaadu isbadashay ama hayso macluumaad dheeri ah oo aad la wadaagto, fadlan xor u ahaaw inaad Gudiga siiso faallo qoraal ah.

Talooyinka Dadweynaha waa la aqbali doonaa laga bilaabo Khamiista, Nofeembar 12 markay tahay 12 pm. illaa Isniinta, Nofeembar 16 markay tahay 12 pm.